ICRC


SOOMAALIYA

# HAWLGALLADA UGU MUHIIMSAN

26-DA ABRIIL 2020



## KA HORTAGGA FAAFITAANKA COVID-19 GUDAHA SOOMAALIYA




Coronavirus wuxuu khatar caafimaad ku hayaa bulshooyinka ay saameeyeen dagaallada iyo rabshadaha,dhibaatooyinka cimilada, iyo barakaca gudaha Soomaaliya. ICRC iyo Ururka Bisha Cas ee Soomaaliyeed (SRCS) ayaa waxay qaadayaan tallaabooyin degdeg ah si ay ula dagaallamaan COVID-19 soo gaaray dalka. ICRC waxay barnaamijyada hadda jira ka dhigaysa kuwo lagula tacaali karo fayruska iyadoo isla markaasna sii wadaysa shaqadeeda lagu taageerayo bulshooyinka ay saameeyeen iska- horimaadyada hubeysan iyo rabshadaha. Si wada jir ah,ICRC iyo Ururka Bisha Cas(SRCS) labadaba waxay tababareen shaqaale iyo mutadawiciinta Ururka Bisha Cas iyada oo ujeedadu tahay kor u qaadista wacyiga ku saabsan COVID-19 iyo tallaabooyinka ay tahay in la raaco si looga hortago in cudurkaan sii fido.

### BULSHOOYINKA DHEXDOODA

ICRC iyo Ururka Bisha Cas waxay caawimaad gaarsinayaan bulshooyinka, oo ay ku jiraan dadka barakacay, si looga hortago ku faafida COVID-19 degaannada ay ka shaqeeyaan **29-ka** xarumaha daryeelka caafimaadka aasaasiga ah (PHC)ee Ururka Bisha Cas oo ay taageerto ICRC ee koofurta Jubaland, Maamulka Koofur galbeed, Hirshabelle iyo Galmudug. Somaliland iyo Puntland, Ururka Bisha Cas waxay hawlo isku mid ah ka fulinayaan 35 xarumaha daryeelka caafimaadka aasaasiga ah(PHC) oo ay taageerayaan xubno kale oo ka socda Dhaqdhaqaaqa Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas.

Si loo fuliyo farriimaha guud oo ka hortagag ah, sida raadiyaasha, **10** raadiye oo wadan ka oo dhan ah ayaa la baahiyey.

- **604** mutadawiciin iyo **378** shaqaale caafimaad ayaa loo tababarey farriimaha ka hortagga 'Covid-19' oo ka kala socda, koofurta iyo bartamaha Soomaaliya, waxaa lagu tababaray **463** shaqaale caafimaad oo ka shaqeeya **4** ilbitaal oo ay ICRC taageerto.



- 19,470 wacyi geliyeyaal caafimaad oo ah 10 kooxood, waxaana abaabulay shaqaale caafimaad and hogaamiyaasha Diimeed waxaana lagu qabtay isla goobtaas waxaana ka shaqeeyey shaqaale daryeelka caafimaad aasaasi ah; 186,004 xarumaha caafimaadka aasaasiga ah, oo ah shaqaale caafimaad Banaadir, Jubbada Hoose, Gedo, Shabeellaha Hoose, Hiiraan, Shabeellaha Dhexe iyo Galgaduud; 1,035 Kulan ayaa lagu qabtay Isbitaalada, waxaana ka qeyb qaatay 5,652 qofood.
- 29 xarumo daryeelka caafimaad aasaasiga ah oo ay ICRC taageerto iyo 35 goobood oo gacmaha lagu dhaqdo ayaa la diyaariyey, waxaa kaloo jira 10,000 oo suuli ayaa Kalooriin lagu shubay si jeermiska looga dilo, waxaa kale oo la qeybiyey 38,710 oo saabuun ah.
- 143,568 saabuun ah ayaa loo qeybiyey bulshada.
- 29-ka xarumood ee daryeelka caafimaadka ayaa la diyaariyey iyo meelo kala duwan oo ka faaideystayaasha lagu hubiyo caafimaadkooda, shaqaalaha Bisha cas ah iyo mutadawaciin ayaa la tababaray si ay u taageeraan una ilaaliyaan bulshada iyo daba galkooda. 49 kulan cashiro caafimaad ah oo ay ka qeyb qaateen 239 ruux ayaa la qabtay. ICRC waxay taageertaa dabagalka iyadoo la marayo lambarka wacida bulshad, 71 dabagal oo ah la xirirta 31 Kiis oo laga shakiyey ayaa hada Raadiyaasha Banaadir Baydhabo Kismaayo Bardhere iyo Cel waaq ayey ku raad joogaan.
- Teendho ayaa la dhisi doonaa Isbitaalada Baydhabo Madiina iyo Keydsaneey si looga shaqeeyo COVID-19 ( laakiin waa 5% Kiisaska u baahan doona Oksajiin ) iyo meelaha lagu koontaroolo cudurada, iyo isticmaalka qalabka ka hortaga shaqsiga tababarkiisa ayaa la siiyey isibitaalada, iyo qalab caafimaad, daaweyn iyo qalabka ka hortaga shaqsiga. Madaxa kal kaaliyayaasha iyo macallimiita kal kaaliyayaasha ayaa lagu tababaray.
- Meelaha lagu hubiyo iyo xarumaha karantiilka oo ah 15 iyo 10 sariir Isbitaalada Kismaayo iyo Keysdanay ayaa la diyaariyey.

Shaqooyinka wacyi geliyaha nadaafada bulshada, ICRC iyo Bisha Cas iyo kooxahooda mutadawaciinta ayaa sameeyey booqasho guri - guri ah iyagoo markaas u sheegayo fariin ku saabsan COVID-19, waxayna siinayeen saabuun iyo kaniini Kalooriin ah.

- 8.5 Malyan oo kariini Kolooriin ah iyo 284, 856 oo Sabuun ah ayaa Sagaal xarumood oo Bisha cas ayaa samigooda laga siiyey ololе wacyi gelin ayaa la qorsheyey, in ka badan 156,000 oo guri ( 930,000 qof) oo ah meelaha webiga u dhow.
- 42 Mutatawaciin Bisaha cas ah , Baardheere, Ceel waaq iyo Dhobley ayaa lagu tababaray faahfaahinta wacyi gelinta fariimaha nadaafada iyo ka hortaga COVID-19.
- 8,055 guri ( 48,330 ka faaidesteyaal ) oo degmada Baardheere ah iyo 4,992 guri ( 29,952 ka faaidesteyaal ) ee degmada Ceel waaq waxay heleen saabuun iyo kanini Kalooriin, ka hortaga COVID-19 iyo warqad ka hortag ah ka hadlaysa.

## QAABKA DHISMEEDKA SHAQADA BISHA CAS /ICRC EE XIRIIRKA DIB U MIDOWGA QOYSASKA

- Dhammaan mutadawaciinta Bisha cas ee xiriirka dib u midowga qoysaska ayaa waxay si kooban fariin ka hortaga COVID-19 ugu sheegeen ka faaidestayaasha caafimaadka, waxaana loo qeybiyey alaabo caafimaad, 6 xero barakacayaal oo Muqdishu ah, 3 alaabo fara xal Baydhabo ah, 3001 Baraag biyo ayaa lagu dhisay xero walba, 400 xero bara kacayaal ayaa ka faa'idi doona faya-dhowrkan iyo telefoon lacag la'aan ah oo xiriirka dib u midowga qoyska ah.
- Faraxal ayaa lagu dhisay 3 xafiis oo ah Bisha cas hogaanka socdaalka ee Soomaalilaan iyo Punlaan iyo meelaha ay ka soo galaan qaxootiga ku soo noqonayo dhulkooda hooyo. dekadaha Berbera iyo Boosaaso, Kooxda xiriirka dib u midowga qoysaska waxaa lagu qalabeeyeen alaabo faya-dhowr ah iyo telefoon lacag ala'aah oo xiriirka dib u midowga qoysaska ah.

## MEELAHA XABSIYADA AH

In ka badan **20** xabsi, ayaa macluumaad ku saabsan ka hortagga COVID-19 iyo agabka fayo-dhowrka laga qeybinaya. Goobaha ay dadku ku badan yihiin ayaa waxaa la gaarsiin doonaa tallaabooyinka fayo-dhowrka oo dheeraad ah iyo, meelo loogu talagalay gacmo-dhaqashada ayaa loo diyaarin doonaa.

Si ay u daboolaan baahidooda **6** bilood ee soo socoto alaabo nadaafadeed ayaa loo qeybiyey dhammaan maxaabiista, xabsiga iyo shaqaalaha meelaaha oo xabsiyo Soomaaliya ah oo uu ka mid yahy xabsiga dhexe ee Moqdishu, Kismaayo, Baydhabo, Garoowe iyo Hargeisa.

- Fariin ku saabsan ka hortaga COVID -19 oo ay la socoto Boorar iyo alaabo kale ayaa la siiyey dhammaan maxaabiista shaqaalaha, xabsiga iyo maamulayaasha. **1,000** In ka badan oo ah maasgarayaal wejiga lagu xirto ayaa la siiyey shaqaalaha maxaabiisita.
- Saabuun ayaa loo qeybiyey in ka badan **4,045** maxbuus iyo **738** shaqaale maxbuus
- In kabadan **100** oo xarumo gacmo-dhaqashada ayaa loo qalabeeyay si loo hubiyo in maxaabiista iyo shaqaalaha xabsiga ay marin u heli karaan marwalba.
- In ka badan **36,000** oo saabuunta dhaqida ah **9,000** kg oo oomad ah, alaabo kale oo nadaafada ah iyo qalab ayaa la siiyey.
- Telefoon iyo Simi Kaaro ayaa la siiyey si maxaabiista ay ula xiriiraan qoysaskooda marka ay xiran yihiin oo qoysaskooda loo diido in ay soo booqdaan.

**ICRC Somalia Delegation**
Denis Pritt Road
P.O. Box 73226 - 00200
T +254 20 2719 301
Nairobi, Kenya

Xafiisyadha ICRCda ee Mogadishu, Kismayo, Garowe, Baidoa, Jowhar and Hargeisa.
www.icrc.org
© ICRC, Abriil 2020

ICRC

ICRCdu waxay caawisaa dadka adduunka ee ay saameeyeen coladaha hubeysan iyo xaaladaha kale ee qalalaase, iyadoo sameynaya wax kasta oo ay awooddo si ay u ilaaliso sharaftooda una yareeyso dhibaatadooda, waxayna badiyaa la shaqeeysaa Laanqayrta Cas iyo Bisha Cas. Hay'adda waxay kaloo raadinaysaa in ay ka hortagto caqabadaha iyadoo horumarinayso isla markaana xoojinayso xeerka aadamnimada, waxayna kale kor u qaadaa mabaadii'da bani'aadamnimada ee caalamiga ah.

facebook.com/ICRCAfrica
twitter.com/ICRC_Africa
instagram.com/icrc_afrique
blogs.icrc.org/Somalia

Reference number